



Adeegyada Dugsiyada Gaarka ah ee ay Waalidiintu Ilmahooda ku Meeleeyeen (PPPSS)

Adeegyada Dugsiyada Gaarka ah ee ay Waalidiintu Ilmahooda ku Meeleeyaan waxaa weeyaan adeegyo waxbarasho khaas ah oo loo fidiyo ardeyda dhigata dugsiyada gaarka ah. Sida uu dhigayo sharciga dawlada-dhexe iyo midka dawlad-goboleedka, San Diego City Schools waxay leedahay nidaam ay ku caawiso dugsiyada gaarka ah ee ay carruurta baahida gaarka ah leh ku jiraan, waxayna aqbashaa carruurta ay dugsiyada gaarka ah u soo gudbiyaan iyo kuwo kaleba, isla mar ahaantaasna, waxay ku sameysaa qiimeynta ardeyda looga shaki qabo inay curyaamiin yihiin.

Kooxda Barnaamijka Waxbarashadda Shakhsiyeed (IEP) haddii ay go'aan ku gaadhaan in ardeygaasu uu curyaan yahay, wuxuu xaq u yeelanayaa in waxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xidhiidha ee la siiyo, kedibna IEP loo sameeyo.

Haddii ay waalidiintu diidaan inay waxbarashadda degmadu siiso Waxbarashadda Guud ee ku Habboon Lacag la'aantana ah, oo ay doortaan inuu ilmahoodu ka diiwaan gashanaado dugsiyada gaarka ah waa In Qorshaha Adeegyada Waxbarashadda Khaaska ah (SEISP) ay adeegyo u fidiyaan.

Sharciga dawlada-dhexe wuxuu xadidayaa lacagaha ay dugsiyada waxbarashadda degmooyinku ku bixiyaan adeegyada ardeyda dugsiyada gaarka ah dhigata loo fidinayo kaas oo lagu jaangoynayo saamiga miisaaniyada dawlada-dhexe ay ugu talogashay Qoddobka Shakhsiyaadka Curyaamiinta ah (IDEA).

Adeegyada Degmada

Adeegyada Waxbarashadda Khaaska ah ee Degmada ee ardeyda ay waalidiintoodu ku meeleeyeen dugsiyada gaarka ah waxay ka kooban tahay waxyaabahan soo socda:

- Aqoonsi iyo qiimeyn.
- Qiimeynta bilowga ah.
- Sameynta IEP.
- Sameynta SEISP haddii uu ardeygu ku jiro dugsiyada gaarka ah.
- Ogeysiinta sannadlaha ah ee ku saabsan in la helayo adeegyada waxbarashadda khaaska ah.
- Dib-u-qiimeynta saddexdii sannaba hal mar.
- Warbixino, macluumaad, iyo fursado tababaro ah oo loogu talagalay waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiyada gaarka ah.
- Qoraalka Ogeysiinta Nidaamka Nabadgelyada.

Adeegyada La-tashiga

Sida uu nidaamka degmadu dhigayo, ardeyda loogu adeego SEISP waxaa la siineyaa adeegyo la-talin sannadkiiba laba jeer. Adeegyada la-talinta waxaa ka mid ah ka talo-bixinta dhexgelista inta aysan wax dhicin marka ay habboon tahay iyo macluumaadka wax dhigista iyo waxbarashadda taageeraya.

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Warbixinada kala Xidhiidh: Adeegyada Dugsiyada Gaarka ah ee ay Waalidiintu Ilmahooda ku Meeleeyeen: (858) 573-5977

Su'aalaha Warbaahinta: (619) 725-5578

<http://www.sandi.net/depts/specialed/>

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 136,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 202 oo dhismeyasha waxbarashadda ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 15,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta ee fasalada xanaanada ilaa iyo fasalka 12aad. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

Somali Version: PPPSS 2005

“Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah.”

OO KOOBAN

- ❖ Barnaamijka Adeegyada Dugsiyada Gaarka ah ee ay Waalidiintu Ilmahooda ku meeleeyeen (PPPSS) wuxuu adeegyo la-talin ah u fidiyo ardeyda curyaamiinta ah ee ka diiwaan gashan dugsiyada gaarka ah.
- ❖ Xafiiska PPPSS wuxuu hada u adeegaa qiyaastii ardey dhan 200 oo ka qaybgala in ka badan 75 dugsiyada gaarka ah ee gobolka San Diego dhexdeeda ku yaal.
- ❖ Adeegyada la-talinta ee ardeyda ku jirta Qorshaha Adeegyada Waxbarashadda Khaaska ah waxaa loo heli karaa barnaamijyada waxbarashadda khaaska ah ee soo socda:
 - Macallinka Takhasuska gaarka ah leh
 - Carrabka iyo Luuqada
 - Dhagoolnimada iyo Dhakanaanta
 - Lugaha iyo gacmuhu daciif yihiin
 - Araggu daciif yahay
- ❖ Si ay ardeyda dugsiyada gaarka ah ku jira u helaan adeegyada waxbarashadda khaaska ah waxaad la xidhiidhaa qofka takhasuska waxbarashadda khaaska ah u leh ee ku sugan degmada uu ardeydu wax ka dhigto, ama waxaad la xidhiidhaa xafiiska PPPSS:

Qofka Takhasuska leh (858) 573-5977

Carrabka/Luuqada (858) 627-7510

Aqoonyahanka Cilmi-nafsiyada (858) 627-7511

Dhacdooyinka yar (858) 490-8451